



PORTRLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku dhawaaqida Maamulaha Ku meel gaarka ah ee Cusub ee Dugsiga Scott ee Gina Roletto

Luulyo 2017-ka

Bulshada Scott ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Gina Roletto oo soo ahayd tahay kaaliyaha maamulaha ee Cesar Chavez K8 tan iyo 2013-kii, ay noqon doonto maamulaha ku meel gaarka ah ee Scott K-8 ee sanad dugsiyeedka 2017-18-ka. Gina waxay ka tirsanayd PPS tan iyo 2011-kii, iyada oo markii hore soo noqotay kaaliyaha maamulaha ee Vernon K-8.

Gina waxay waayo-aragnimo kala duwan u keenaysaa bulshada Scott. Waxay xirfad dheer oo guul leh ku dhex leedahay Dugsiyada Degmada Hillsboro. Laga bilaabo 1998-kii, waxay wax u soo dhigatay fasallada dugsiyada hoose iyo dhexe iyada oo ku soo shaqaysay takhasuska ESL kaasi oo xoojiyey xiriirkha ka dhexeeyaa dugsiga iyo qoysaska. 2007-kii, waxay qaadataay kaalin hoggaamineed iyada oo tababare tacliimeed ka soo noqotay dhowr dugsi si loo hirgeliyo aragti degmo oo ku saabsan aqoonta. Muddo laba xagaa ah, Gina waxay sidoo kale soo noqotay Isuduuhaha Dugsiga Xagaaga ee Muhaajirka K-12. Waxay ka dibna soo noqotay Maamulaha Ardayda iyo Isuduuhaha IB ee Dugsiga Dhexe ee South Meadows iyada oo diirada saaraysay abuurista dhaqan tacliimeed oo ka jira dugsi cusub.



Gina Roletto

Gina waxay shahaadeeda jaamacadeed ee Cilmiga Dhirta iyo shahaadeeda Master-ta ee Waxbarida ka qaadataay University of Washington. Waxay sidoo kale ayidaada ESOL iyo ruqsada maamulka ka haysataa Kulliyada Lewis iyo Clark. Gina waxay u soo adeegtay Guddiga Miisaanka Shaqo ee PAT/PPS, iyada oo wali u adeegaysa guddiga Maamulayaasha Ururka Latino ee Oregon, iyada oo dhawaana lagu martiqaaday in ay u adeegto Guddiga Tala bixinta Dib u eegida Xuduuda Degmada.

Gina waxay sheegtay in iyada oo ah hoggaamiye waxbarasho oo laba luqudood iyo dhaqan leh, ay doonayso in ay shaqaalaha Scott iyo bulshada ka taageerto shaqada ay wadaan si ay u bixiyaan helitaanka waxbarasho adag iyo ilaha dhaqaale oo loogu talagalay ardayda. Waxay doonaysaa in ay hab ka turjumaya nidaamkeeda hoggaamineed iyo awoodsiinta shaqaalaha iyo ardayda u keento Scott inta ay sii wadaan dhisida awood horseedi doonta gaaritaanka guul sii kordhaysa. Gina waxay xiisaynaysaa in barato sheekada ku saabsan bulshada Scott, isla markaana waxay ku rajo weyn tahay in ay iskaashi la yeelato bulshada si loo sameeyo waxa u wanaagsan ardayda.

Gina waxay dareemaysaa in sii wadashada waxbarashadeeda gaarka ah, iyo u furfurnaanta dhinacyada kala duwani ay markasta muhiim tahay. Waxay jeceshahay wakhti la qaadashada qoyskeeda, iyo ka qayb galka dhacdooyinka cayaaraha iyo ruwaayahada.

Fadlan igula soo biira tahniyadda Gina Roletto ee magacaabida loo magacaabay in ay noqoto maamulaha ku meel gaarka ah ee Dugsiga Scott.



Yousef Awwad
Interim Superintendent

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.